

Covid-19 Caafimaadka Dadweynaha Shuruudaha Ganacsiga



Si loo yareeyo kororka naxdinta leh ee kiisaska COVID-19 ee gobolkeenna, waxaa jira hagitaan cusub oo gobolka oo dhan oo loogu talagalay maqaayadaha iyo ganacsiyada ka shaqeeya Magaalada Seattle. Hagedan hoos lagu sharaxay waxey ku biirayaan shuruudaha jira ee caafimaadka bulshada ee ganacsiyada sida:

- Looga baahan yahay macaamiisha inay xiraan waji daboolka sanko iyo afkooda.
- U hogaansanaanta kala fageynta jirka
- Joogtaynta tilmaamaha khuseeya markiiba inta qof ee meheradda ku sugnaa karta iyo dabeecadaha kale ee ilaalinta shaqsiyeed ee amarka gobolka oo dhan looga baahan yahay.

Ku xadgudubka amarkan waa dambi yar, waxaa lagu ciqaabi karaa ilaa 90 maalmood oo xabsi ah iyo ilaa \$100 ganaax. Ganacsiyada sida joogtada ah ugu xadgudba amarka waxay waayi karaan shatiga ganacsigooda

Makhaayadaha waxay dib u bilaabi karaan cunnooyinka gudaha oo ah boqolkiiba 50 awood ahaan iyadoo miisaska u dhexeeyaan ugu yaraan 6 fuudh. Waxaa fadhiisan karo miis kasta ilaa 10 qof oo aan lahayn xaddidaad qoys. Adeegga khamriga waa inuu dhammaadaa 12-ka subaxnimo, laakiin adeegga cuntada ayaa laga yaabaa inuu sii socdo 12-ka subaxnimo kadib.

Goobaha Jimicsiga iyo jiiimka ayaa dib u bilaabi kara howlaha gudaha oo ah boqolkiiba 50 awood ahaan. Isboorti bannaanka ayaa sidoo kale dib u bilaabi kara awoodda boqolkiiba 50, ama 400 oo qof ugu badnaan (oo ay ku jiraan daawadayaasha), hadba kii ka hooseeya.

Xarumaha Bowling, Matxafyada / meelaha xayaawanada / Aquariums iyo Tiyaatarada Filimku waxay ku furmi karaan boqolkiiba 50 ama 400 qof ugu badnaan, hadba kii ka hooseeya. Masraxyada filimka wadista-waa la ogol yahay waana inay sii wadaan inay raacaan hagitaanka tiyaatarka filimada hadda socda.

Hanti Ma-guurtada: Awoodda xafiiska waxaa loo kordhiyay boqolkiiba 50 iyo aragtida guryaha, kormeerka, qiimaynta, iyo aragtida socodka ugu dambeeya waxaa lagu qabanqaabin doonaa ballan waxaana lagu xaddidi doonaa 10 qof oo goobta jooga (oo aan ku jirin wakiilka guryaha / Hantiile), iyadoo lagu sameynayo kala fogaansho bulsho markasta.

Tafaariiqda Bakhaarka ayaa ku xaddidnaan doona awoodda boqolkiiba 50 iyo meelaha la wadaago sida maxkamadaha cuntada ayaa furmi kara, iyadoo ku xiran shuruudaha COVID-19 ee goobaha raashinka.

Adeegyada Xirfadleyda waxaa looga baahan yahay inay amar ku siiyaan shaqaaluhu inay ku shaqeeyaan guriga markay suurtagal tahay ayna xirtaan xafiisyada dadweynaha haddii ay suurogal tahay. Xafiisyada ay tahay inay furnaadaan waa inay ku xaddidaan degganaanta boqolkiiba 25 ee xaddidaadda gudaha.

Xarumaha Daryeelka muddada-dheer waxaa loo oggol yahay in dibada lagu soo booqdo. Gudaha dhismaha in lagu soo booqdo waa mamnuuc, laakiin waa loo ogol yahay shakhsiyaadka muhiimka ah ee daryeela dhamaadka nolosha.

Intaa waxaa sii dheer, ganacsiyada waxay u oggolaan karaan shaqsi inuu iska qaado weji daboolka duruufaha soo socda:

- Inta aad ku sugan tahay aagaga caamka ah ee banaana, waa haddii masaafada ugu yaraan lix fiit ujirsada xubnaha aan reerka ahayn.
- Marka dhinac kale uu dhago la 'yahay ama maqalkiisu culus yahay oo uusan xirneyn wejiga waa u muhiim la hadalku.
- Markaad qabaneyso adeeg u baahan in si ku meel gaar ah looga qaado daboolka wejiga.
- Markii loo baahdo si loo xaqiijiyo aqoonsiga qofka
- Marka sharciga federaalka ama gobolka uu mamnuucayo xirashada wejiga ama uu u baahan yahay in laga qaado indho shareerka

Su'aalaha ku saabsan shuruudaha

Fadlan wac 206-684-2489 (adeegyo turjubaan ayaa la heli karaa) ama booqo

www.seattle.gov/business-regulations/business-and-restaurant-requirements-during-covid-19

www.seattle.gov/mayor/covid-19/covid-19-reopening

Magaaladu waxay leedahay dhowr ilo oo jira si ay uga caawiso ganacsiyada yaryar inay furnaadaan inta lagu jiro Cudurka faafa ee COVID-19.

www.seattle.gov/office-of-economic-development/covid-19
<http://startup.choosewashingtonstate.com/working-washington-round-3/>



Seattle
Finance &
Administrative Services